Buux-dhaafka, waxa kale oo u sii dheer baahi culus oo maxaabiistu u qabaan helitaanka biyo nadiif ah, taasi oo u baahan kaalmo uga timaada beesha caalamka.

Xabsiga Dhexe ee Muqdisho ma laha ilo-biyood laga heli karo biyo nadiif ah oo la caboo. Labadii ceel ee xabsigu biyaha ka heli jiray waxaa shaqaynaya ceel kaliya, waxana ceelkaa laga helaa sideed kubik mitir oo biyo ah maalintiiba laakinse waa biyo aad u dhanaan, oo aan la cabi karin. Sidaa awadeed waxa loo baahan yahay in adeegan tiixgalin la siiyo, isla markaana waxa suurtogal ah in ay lama huraan noqoto in ceel kale meesha laga qodo, loona sameeyo haamo biyaha lagu kaydiyo, oo weliba biyaha lagu sifayn karo iyo dhuumaha biyaha qaada.

Iyada oo ay ku xiran tahay xaalada biyaha ee dhulka ku hoos jira iyo meesha uu ku yaalo xabsigu, waxa laga yabaa in loo baahdo mashiin yar oo biyaha sifeeyaa, oo u gaar ah biyaha la cabayo iyo kuwa lagu isticmaalayo khusheenka cuntada lagu diyaariyo. Hada waxa biyo loogu keenaa booyad u keenta ilaa 3,500 litir oo biyo ah maalintiiba, oo loogu talo-galay cabitaanka, waxana qiimahoodu yahay 0,005 oo doolar litirkiiba. Xadiga biyaha ee hada xabsigu helaa kuma fila baahida biyaha ee maxaabiista ku jirta, waayo biyaha waxa loo isticmaalaa dhamaan ujeedooyin kale duwan, tusaale ahaan cunto-karinta, cabitaanka, nadaafada, iyo waysada salaada, iwm.

Dadkii laa waraystay markii qiimentan la samaynayay waxa ay sheegeen in biyaha booyadu keentaa ay yihiin kuwo "nadiif ah, oo waliba sahal loo qaadi karo", balse masuuliyinta xabsigu marnaba ma tijaabin fayo-qabka biyahaasi.

Qol-xabsiyeed kasta waxa uu leeyahay qoob loogu talo-galay qubayska/dhaqida, iyo hal musql oo ka dhaxaysa dhamaan maxaabiista. Labadaa meeleed biyaha lagu isticmaalo waxa laga soo dhaamiyaa ceelka. Hase yeeshiee, isla biyaha qashinka ee xabsiga waxa lagu sii daayaa bada u dhow xabsiga, sidaa awadeed waxa ay tani sabab u noqon kartaa dhibaatooyin xaga nadaafada ah iyo weliba cudurada faafa oo ka dilaaca.

Maxaabiistu qolalkaxabsiga kuma haystaan baaxad ku filan dhowrsanaanta. Tusaale ahaan marka ay isticmaalayaan goobta qubayska ama musqusha, oo ah mid ku dhextaala qolka xabsiga, mana jiraan meelo gaar ah oo maxaabiistu dhigan karaan aaladahooda gaarka ah. Maxaabiistu waxa ay hebeenkii seexdaan dhulka, isla maalintiina halkaasi ayay fariistaan. Maxaabiista lama siiyo sariiro ama furaashyo ay ku jiifsadaan. Waxa kale oo aanay haysan bustayaal iyo go'yaal ay ku seexdaan.

Nadaafada qolalka iyo xabsiga waxa ka masuul ah isla maxaabiista oo kolba koox ayaa nadifisa. Maxaabiistu waxa ay iska xiran yihiin dharkooda gaarka ah, waxana u keena qoyska iyo qaraabada maxaaabiista, ama qaraabada maxbuusyada qaarkood ayaa maxaabiista kale ugu deeqa dharka.

Helitaanka iftiinka iyo hawada maxaabiistu waxa ay ku xiran tahay hadba qeybta ay ku xiran yihiin. Qolalka xabsiga ee u sii jeeda xaga barxada hore waxa iftiinka iyo hawaduba kasoo galaan iridi hore oo ay ku xiran tahay biro garaa'id ah. Guud ahaan waxa kale oo jirta dariishad ku taala gidaarka gadaal ee qolka. Kulka ka dhasha tirada maxaabiista isku badan iyo iyaga oo ku jira qolka ilaa 20-saacadood maalintiiba waxa ay ciriri galisaa wareega hawada. Balse xaalandu waa kasii xun tahay marka la fiiriyoo qolalka la galiyo caruurta ama dadka mudakarka ah ee lagu ciqaabayoo

xad-gudubyada dhishibiliinka, waayo labada iridood waxa ay u jeedaan luuqa la maroyo.

### **Qolalka maxaabiistu ma laha koronto.**

Sida ay sheegeen wakiilada ciidamada asluubtu waxa loogu talo-galay in lagu quudiyo maxbuuskiiba hal doolar maalintii. Maxaabiista waxa cuntada la siyyaa sadex jeer maalintiiba. Waxa suurto gal ah in maxaabiistu kasoo baxaan qolka xabsiga oo soo doontaan cuntada. Subaxii (qiyas ahaan 5-ta subaxnimo) ayaa maxaabiista la siyyaa rooti iyo shaah, qadadii (duhurkii) waxa maxaabiista la siyyaa koob bariis ah ama biinis ah, cashadii (qiyas ahaan 5-ta galabnimo) waxa la siyyaa saxni masago ah iyo (?)

Masuuliyiinta xabsigu ma siyyaan maxaabiista cunto ku filan oo kala duwan. Cuntada maxaabiista waxa taageera cuntooyin ay qoysaska maxaabiistu soo kariyaan oo keenaan xabsiga, kadibna shaqaalaha xabsiga ayaa u geeya maxaabiista. Hadaba cuntada ciidamada asluubtu bixiyaan oo aan deeqin maxaabiista, marka la fiiriyo xaga xadiga cuntada iyo weliba nafaqo ahaan, waxa ay kaliftaa in maxaabiista cuntada loo keenaa la wadaagaan maxaabiista kale ee aan cunto looga keenin dibada.

Caadi ahaan waxa cuntada xabsiga dibada ku kariya maxaabiis loo doortay cunto-karinta. Maxaabiista cuntada karisa lama badalo oo jadwal ma laha, waxana dhacda in isla maxaabiistaasu ay maalin walba cuntada u kariyaan dhamaan maxaabiista kale.

### **Daryeelka caafimaadka**

Qodobka 30-aad iyo 31-aad ee Xeerka Xabsiyada 1971 waxa uu dhigayaa nidaamka guud ee in maxaabiistu helaan daryeel caafimaad. Qodobka 30-aad, waxa uu farayaa in "goob kasta oo xabsiya ama dadka lagu xayiro

ay lahaato goob u qaabilsan daryeelka caafimaadka". Qodobka 31-aad waxa dhigayaa in "goob kasta oo xabsi ah ama dadka lagu xayiraa ay lahaato sarkaal u qaabilsan caafimaadka oo ka masuul ah daryeelka caafimaadka ee maxaabiista".

Guud ahaan daryeelka caafimaad ee xabsigu waxa uu u baahan yahay waxqabad baaxad leh. Waxa kale oo Xabsiga Dhexe ee MUqdisho ka taagan mashaakilaad xaga nadaafada ah, taasi oo dhalin karta in ay dilaacaan cudurada faaha. Hase yeeshi mashaakilaadkan waxa loo baajin kari la'yahay oo sabab looga dhigaa in aanu xabsigu haysan dhaqaalaha iyo nidaamka fulineed ee lama horaanka u ah. Sidaa awgeed, waxa iska macruuf ah in ay ka dilaaci karaan cuduro kala duwan, tusaale ahaan cudurada kalooraha, TBC-ada, malaariyada, infekshanada midhicirka, parasites-ka oo dhamaan ah cuduro halistoodu dul hoganayso Xabsiga. Masuulada xabsigu nooma soo gudbin xog ku saabsan halista cudurka HIV/AIDS ee Xabsiga ka jirta. Baadhitaanka cudurkan waa mid shaqsigu iskii u raadsan karo, balse wakiilada Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta iyo weliba Ciidamada Asluubtu waxa ay noo xaqijiyeen in ay taageeraan oo u fududeeyaan in ay hay'adaha UN-tu maxaabiista u fidiyaan baadhitaanka HIV-ga, iyo weliba in ay maxaabiista siyyaan macluumaadka caafimaad ee ay u baahan yihiin.

Xabsiga Dhexe ee Muqdisho ma laha karaan caafimaad oo daryeeli kara maxaabiista, hadii uu jirana waa mid iska liita oo xadidan. Waxana walaacu ka jiraa in aan xabsigu lahayn qalabka iyo shaqaale u carbisan in ay daryeelaan caafimaadka maxaabiista. Saraakiisha xabsigu waxa ay sheegeen in ay jiraan diiwaan lagu kaydiyo macluumaadka caafimaadka, isla markaana lagu qoro wixii kusoo kordha caafimaadka maxbuusyada. Balse waxa ay tani u muuqataa in macluumaadka noocaas ah lagu qoro

oo kaliya xaanshida waaranka gadaasheeda, waxana lagu qoraa wixii daawooyin ah ee la siiyay iyo wixii daaweyn ah ee maxbuuska loo qabtay, balse waa hadba wixii loo helo ee suurtogalka ah.

Xabsiga Dhexe ee Muqdisho hada ma laha dhakhtar ka hawl-gala xabsiga. Waxana hawla ha caafimaadka u qaabilan 5 kalkaaliye caafimaad/neeras ah, oo sadex ay yihiin dumar iyo laba rag ah. Dumarka neerasta ahi waxa ay khaas u yihiin kaalmaynta dumarka maxaabiista ah. Qiimeyntan uma suurtogalin in ay cabiraan xirfadaha iyo aqoonta caafimaad ee neerasta ka hawlgasha xabsiga. Hase yeeshi masuuliyiinta xabsigu waxa ay sheegeen in neerasta ka hawl-gala xabsigu ay qaarkood wax ka barteen dugsi caafimaad ee Muqdisho ku ooli jiray labaatan sano ka hor.

Xabsigu ma laha goob caafimaad, mana jiraan daawooyin khaas ah oo lagu daaweyyo maxaabiista. Waxa kaliya ee xabsiga yaalaa waa sanduuqa loogu talo-galay gargaarka degdega ah, waana waxa kaliya ee caafimaad ahaan u diyaar ah xanuun kasta oo ku dhici kara maxaabiis gaaraysa ilaa 722 maxbuus.

Ma aanaan helin wax macluumaad ah oo ku saabsan sida loo daaweyyo maxaabiista maanka ka jiran iyo kuwa xaga garaadka ka liita. Xilgii dawladii Siyaad Barre waxaa jiray cusbitaalka dadweynaha oo u khaas ahaa dadka maanka ka jiran iyo kuwa garaadka ka liita. Waxana, sidoo kale, cusbitaalkaasi lagu xayiri jiray maxaabiista maxkamadu soo cadayso in aanay lahayn karaan ama garaad ku filan oo sharciga lagula tiigsado.

Dhamaan dadkii aanu waraysanay midna walaac kama muujin isticmaalka maandooriyyaasha ee xabisaga dhexdiisa. Waxana ay u muuqataa in maxaabiista isticmaala maandooriyyaasha ay ku yar yihiin xabsiga. Istimcaalka maandooriyyaasha la isku mudo waxay u muuqataa mid

iska kooban, balse Saraakiisha Xabsigu ariintan kama shegin macluumaaad khaas ah.

### **Maxaabiista iyo xiriirka dibada**

Maxaabiistu xiriirka ay la leeyihiin dibadu maaha mid joogto ah, ama ku filan. Xabsiguna macluumaaad kooban ayuu naga siiyay nidaamkan. Balse waxa iska macruuf ah in loo baahan yahay in maxaabiista loo kordhiyo xiriirka dibada si markaasi loogu diyaariyo la qabsiga iyo la-dhaqanka bulshada marka xabsiga laga sii daayo.

Sharcigu waxa uu si quman u qeexayaa in la dhiirigaliyo oo la sahlo xiriirka maxaabiista iyo qoysaskooda 31, tusaale ahaan booqashooyinka xabsiga iyo weliba xiriirka waraaqaha<sup>32</sup>.

Wakiilada Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaaftu waxa ay xaqijiyeen in shaqaalaha hay'adaha kaalmada sharcigu, tusaale ahaan 'Somali Women Development Center (SWDC)', 'Somali Women Layers Association (SWLA)', Consortium of Grass Root Women Organizations (COGWO) iyo Community Children organization (COCO, oo ah hay'ado samo-fal oo aan dawli ahayn, oo ay badanaa maalgaliyaan maalgaliyayaal iyo ururo caalami ah, ay maalin walba soo booqdaan maxaabiista iyada oo aan wax xayiraad ah lagy xidhin). Hase yeeshee masuuliyiinta xabsigu ma aanay noo sheegin macluumaaad lagu kalsoonaan karo oo xaqijin kara tirada maxaabiista ee kaalmo sharchiyeed ka heshay ururadaas soo booqda xabsiga.

Caadi ahaan, maxaabiita waxa lasoo booqan karaa inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo maalin kasta, kadib marka uu booqashada ogolaado Taliyaha Xabsigu. Waxana inta badan maxaabiistu kula kulmaan

cida soo booqatay qol loogu talo-galay booqashada, mana jiraan wax xayndaab ah oo kula dhexeeyaa maxbuuska iyo cida soo booqatay. Balse qolka booqashada waxa jooga waardiye u jooga in uu hubiyo in aan maxbuuska iyo cida soo booqatay isku gudbin wax madnuuc ah. Waxana waayo hore dhacday dhacdooyin dadka soo booqday maandooriyayaal u keeneen maxaabiista. Wakiilada cadaaladu waxa kale oo ay xaqijiyeen in aan xabsigu ogolaan galmaada isu-taga ee lamaanayaasha, in kasta oo aanay jirin xeer madnuucaya, mase la ogola in xabsiga dhexdiisa lamaanahu iskugu galmoodaan.

Qanuun ahaan, hanaanka maamulka iyo weliba wareegtooyin ayaa fasaxaya in maxaabiistu qoraalo u diri karaan, kana heli karaan xiriirkha dibada, Balse waxaa maxaabiista si quman uga madnuuca ah in ay isticmaalaan telefoonada gacanta lagu qaato/mobile-ka.

### **Maamulka Xabsiga**

Qodobada 25-aaad iyo 26-aad ee Xeerka Xabsiyada 1971 waxa uu dhigataa nidaamka "shaqaalaysiinta maxaabiista". Qodobka 25-aad waxa uu qeexayaa in "dhamaan maxaabiista lagu xukumay fal-dambiyeed, hadii caafirmaadkoodu saamaxayo, in ay waajib ku tahay in ay ka shaqeeyaan xabsiga dhexdiisa ama dibadiisaba". Isla qodobkanu waxa uu sii qeexayaa hanaanka shaqo ee khuseeya maxaabiista qaarkood, tusaale ahaan dumarka iyo caruurtaa aan qaan-qaarin. Qodobka 26-aad waxa uu tibaaxayaa in "maxaabiista xukuman...ee shaqada qabta la siiyo abaal-marinta shaqadooda".

Maxaabiista ku jirta Xabsiga Dhexe ee Muqdisho hada ma qabtaan wax shaqo ah, marka laga reebo maxaabiista qabta hawlahaa cunto karinta ee xabsiga iyo weliba kuwa guta hawlahaa nadaafada ee qolalka,

musqulaha iyo goobaha kale ee la wadaago. Waxa kale oo aan xabsiga ka jirin warshado, iyo beero maxaabiistu ka shaqayn karto. Markaasi waa in muhiimada la siiyaa sidii loo asaasi lahaa maamul wacan oo warshadeed, oo ay si haboon u maalgaliso Dawlada Federaalku iyo beesha caalamku, lagana taageero xaga qalabka, tabo-barada iyo kormeerida mashruucyada noocan ah. Marka laga reebo dhuumaha biyaha ee la rabo in ay biyo nadiif ah u keenaan maxaabiista iyo shaqaalah, waxa kale oo loo baahan yahay hanaan kale oo soo gudbin kara biyo joogto ah (aan dhanaan ahayn) oo lagu waraabin karo beerta loo abuuri karo xabsiga, beertaasi oo noqon karta mid waarta hadii biyahaa loo helo. Hase yeeshie, xilgii qiimeyn, khabiiradu waxa ay shaki ka muujiyeen in goobta xabsigu ku yaalo laga suubin karo beer, waayo meesha uu ku yaalo xabsigu waa meel ciideedu tahay burciid.

### **Waano-celin (counselling), Mashruucyada Dhaqan-celinta iyo U-diyaarinta Sii-daynta**

Qodobka 32-aad ee Xeerka Xabsiyada 1971 waxa uu dhigayaa nidaamka xaquuqda maxaabiista ee xaga waxbarashada, waxana uu xusayaa “in Taliyaha xabsigu qaado talaabo kasta oo lama huraan ah si uu maxaabiista ugu helo fasalo waxbarasho, isla markaana u saamaxo in ay wax bartaan wakhtiga ay firaaqada yihiin, isla markaana bartaan farsamooyinka”.

Hadaba waxa aan shaki ku jirin in ay aad u muhiim tahay in Dawlada Soomaaliyeed iyo Beesha Caalamku in ay iska kaashadaan sidii maxaabiita looga kaalmayn lahaa mashruucyo iyo sahalo lagu kobcinayo waxbarashada iyo farsamada si markaasi maxaabiista loogu sahlo la-qabsiga bulshada marka lasii daayo.

Hada xabsigu uma fidiyo maxaabiista borogaraamyo waxbarasho, mana jiraan macalimiin wax barta Ciidamada Asluubta oo ka socda Wasaarada Waxbarashada. Wakhtigii Dawladii Siyaad Bare waxa jiray borogaraamyo waxbarasho oo joogto ah oo maxaabiista wax loogu bari jiray, taasi oo la mid ahayd sida dugsiyada caadiga ah wax looga barto. Waxbarashada kaliya ee maxaabiistu hada ka heli karaan xabsiga waa waxbarashada diinta. Sida ay sheegeen masuuliyiinta xabsigu waxa borogoraamkaa diiniga ah bixiya Sheekh ay soo magacawday Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta. Sheekhaasi oo xabsiga soo booqada sadex jeer todobaadkiiba, kaasi oo waxbarsho guud maxaabiista ugu fidiya qolalka xabsiga. Balse maxaabiista dumarku ma helaan waxbarashadan oo kale, iyo mid kale oo u dhiganta.

Xabsigu ma laha rugta kutubta ama madxaf, mana jiraan qol loogu talo-galay in fasal ahaan wax lagu barto.

Xabsiga Dhexe ee Muqdisho ma laha borogaraamyo kale oo loogu talo-galay dhaqan-celinta ama waxbarashada maxaabiista, xataa ma laha kuwo loogu talogalay dhalinta/caruurta.

Talo-bixinta lagu soo jeediyay waxa ka mid ah in maxaabiista xirfada leh ee wax dhigi kara, in lagu dhiirigaliyo in ay wax baraan maxaabiista kale. Hase yeeshooo heerka aqoonta ee maxaabiista lagama hayo maclumaad sugar waayo marka maxaabiista la keeno xabsiga lagama qoro maclumaad ku filan.

### **Bad-qabka iyo Amaanka**

Mudadan lagu gudo jiro qiimeynta, Maamulka Xabsigu Dhexe ee Muqdisho uma arkaan in walaac weyni ka jiro xaga badqabka iyo amaanka xabsiga.

Maamulku waxa kale oo ay sheegeen in sadexdii sano ee lasoo dhaafay in aanay xabsiga ka dhicin mashaakilaad waaweyn oo la xiriira shaqo joojin qorshaysan/ama mid aan qorshaysnayn, kacdoono, dagaal ka dhexeeya maxaabiista, ama dirir ku aadan shaqaalaha xabsiga. Sanadkii 2011 waxaa dhintay hal maxbuus oo isku dayay in uu baxsado balse waxa toogtay waardiyaha xabsiga. Taliyaha xabsigu waxa uu cadeeyay in waardiyayaasha fuushan taalooyinka-waardiya oo kaliya loo dhiibo rasaasta/hub-ka, waxana qiyas ahaan shaqadada u heegan ah 20 waardiye. Hawlaha amaanka waxa kale oo sahla maxaabiista laftigooda oo isku qaybiya kooxo isla markaana u adeega sidii "gudiyo maxaabiis". Qaar ka mid ah wakiilada maxabiista iyo xubnaha gudiyadaa waxa toos u magacaaba shaqaalaha xabsiga, magacaabidaasi oo loo fiiriyo kaalinta iyo ixtiraamka maxbuuska la magacaabaya ka kasbaday maxbuusyada kale.

Hase yeeshii maalintii 20-kii bishii Abriil 2012, waxa ka dhacay isku-day xabsi jabin, taasi oo keentay in hubka la isticmaalo waxana ku dhaawacmay dhowr qof oo ay qaar yihiin shaqaalaha xabsiga. Warbixinada rasmiga ah ee Xabsiga waxa lagu xusay in aan maalintaasi maxbuusyo ka baxsan xabsiga, laakiinse ilo-wareedyo kale ayaa sheegaya warar kale oo warkaa ka duwan. Hadaba waxa la oran karaa dhibaatooyinkan ay ciidamada asluubtu la tacaalayaan waxa ay horseed ka tahay buux-dhaafka iyo waliba baahida xaga tabo-barka ee ciidamada asluubta.

### **Maxaabiista ku dhex geeryoota xabsiga**

Kooxdan qiimeyeenta uma suurtogalin in ya helaan xog ku saabsan tirada maxaabiista ah ee ku dhex geeryootay xabsiga ama sababta keentay geerida. Taliyaha xabsigu waxa yy sheegay in sanadkii 2011 ay xabsiga

ku dhex geeryoodeen sadex maxbuus oo u dhintay cudurka kalooraha, hal maxbuus oo u dhintay cudurka HIV/AIDS iyo hal maxbuus oo ay dileen laba maxbuus oo kale, kuwaasi oo u xirnaa sababo la xiriira dil ay hore u geysteen, oo dil ku xukunaa. Wuxuu kale oo jira in sadexdii sano ee lasoo dhaafay, in laba iyo tobant maxbuus oo dil ku xukumay sababtoo ah waxay xubno ka ahaayeen Al Shabaab, ayaa waxa dilkooda lagu fuliyay isla xayndaabka xabsiga dhexdiisa, meeshaasi oo ku aadan inta u dhaxaysa dakeda iyo maadaarka Muqdisho. Waxana xukunka dilkaasi soo ansaxiyay Madaxweyne Sheik Sharif Sheik Ahmed, kadib markii uu codsi ka helay Qareenka Guud (Attorney General), sida waafaqsan nidaamka xeerka qaranka. Waxana xukunka dilkaa fuliyay ciidamada asluubta. Xabnaha Qiimeyntan uma suuto-galin in ay macluumaad dheeraad ah ama faahfaahin ka helaan dilalka sharciyeed ee la fuliyay.

### **Habka Maamulka Gudaha iyo Dhishibiliinka ee Xabsiga**

Taliyaha Xabsiga Dhexe ee Muqdisho waxa uu sheegey in aanay xabsiga ka jirin ururo iyo gudiyo ay maxaabiistu leedahay oo si nidaamsan loo abaabulay oo leh ujedooyin cayiman. Laakiinse waxa uu xaqijiijiyay in ay jiraan gudiyo aan rasmi ahayn oo ka turjuma amaanka iyo danaha maxaabiista. Gudiyadaasi waxa ay door ka qaataan xoojinta nidaamka, dhishibiliinka xabsiga, iyo weliba xalinta khilaafaadka ka dhex abuurma maxaabiista. Waxana gudiyadaasi laga soo xulaa xubnaha maxaabiista ah ee ugu firfircoona, waxana si aan rasmi ahayn loogu doortaa in ay af-hayeen u noqdaan gudiyadaasi maxaabiista. Xabnaha gudiyadaasi awood uma laha in ay talaabo ka qaadaan xubnaha maxaabiista ee dhishibiliinka ku xad-gudba, mana laha awoodo gaar ah oo qy maxaabiista kale ku amraan.

Maxaabiista ku xad-gudubta dhishibiliinka waxa awood u leh oo kaliya in ay talaabo ka qaadaan Ciidamada Asluubta, isla markaana waxa kormeera Taliyaha Xabsiga. Qaybta V<sup>33</sup> ee Xeerka Maxaabiista 1971, waxa uu dhigayaa nidaamka hanaanka dhishibiliinka iyo xad-gudubyada dhishibiliinka ka baxsan iyo ciqaabaha lagu mutaysan karo.

Qodobka 47-aad iyo 48-aad waxa ku taxan liiska dambiyada sahlan iyo kuwa culus ee maxaabiista laga madnuucay. Waxana ciqaabta xad-gudubyada loo xilsaari karaa gudi<sup>34</sup> soo cayimi doonta talaabooyinka<sup>35</sup> laga qaadi doono wixii xad-gudub ee maxaabiistu falaan. Xabsiga Dhexe ee Muqdisho waxa ugu badan xad-gudubyada dhishibiliinka ee maxaabiistu galaan kuwa la xiriira amar-diido, maxaabiista dagaalama ee dirir ama hatigaad dhexmarto. Taliyaha Xabsigu waxa uu sheegay in maxaabiita gala xad-gudubyo xaga dhishibiliinka ah, kuwo fudud ama culus, in aan marnaba lagu qaadin ciqaab dil ah. Balse talaabooyinka ugu badan ee lagu ciqaabo maxaabiistu waa kuwan hoos ku qoran:

- a Cuntada oo laga xadido;
- b Darajada/dhibcaha “akhlaaqda wacan” oo laga dhimo;
- c Qol cidlo ah lagu xiro.

Taliyaha Xabsigu waxa uu sheegay in maxbuus kasta oo laga qaado talaabo dhishibiliinka ku saabsan, in macluumaadka talaabadasi lagu qoro gadaasha xaanshida waaranka ee maxbuuska ama xaanshida amarka xabsiga. Hase yeeshee ma jiraan hanaan rasmi ah oo talaabooyinka dhisibiliinka lagu diiwaangaliyo ama fuliyo: Marka ciidamada asluubtu arkaan xad-gudub ama loo soo sheego waxa ay u gudbiyaan Taliya Xabsiga, kadibna Taliyaha ayaa go'aan ka gaara talaabada laga qaadayo. Laakiinse uma muuqato in uu jiro hanaan sugar oo maxaabiistu

kusoo gudbin karto cabashooyinkooda, gaar ahaan hadii ay rabaan in ay ka cawdaan in dib loo fiiryo talaabo dhishibiliin oo lagu ciqaabay.

Sida ay sheegeen shaqaalaha Asluubtu, ma jiraan maxaabiis lagu hayay qofka cidlada ah wax ka badan shan iyo toban maalmood. Maxbuuska lagu xukumo qolka cidlada ah waxa loo ogol yahay in uu qolka kasoo yara baxo laba jeer maalintii, balse aan markiiba ka badnayn laba saacadood; subaxii iyo galabtii. Maxaabiista kaligood cidlada lagu xiro ayaaba iyagu wakhti ahaan kasii yara badan mudada ay qolka kasoo baxaan, waayo maxaabiista caadiga ahi waxa ay qolka kasoo baxaan sadex jeer (sadex jeer oo min hal saac ah maalintii). Qolalka Xabsiga Dhexe ee Muqdisho waa kuwo aad u yaryar, isla markaana hawada ayaa aad ugu yar.

### **Noocyada Maxaabiista Gaarka ah**

#### **Dumarka**

Maxaabiista dumarka ah, kuwa xukuman iyo kuwa xukun sugayaasha ah, waxa ay ku jiraan qol u gaar ah, waxana waardiyeeyaa dumar. Maxaabiistaasi da'doodu waxa ay u dhaxaysaa 15 ilaa 60, kuwaasi oo la sheegay in ay ku jiraan sadex maxbuus oo da'doodu ka yar tahay 18 jir. Qolka ay ku jiraan waa mid weyn, oo hawada iyo ilayska cadceeduba ku filan yihiin. Marka loo fiiryo qaybaha kale ee xabsiga, qolka dumarku ku jiraan waa mid ku filan maxaabiista ku jira waayo tiradoodu waa ka yar tahay tani raga (12 markii aanu booqanay), laakiinse xaaladaha kale ay ku sugaran yihiin waa mid la mid ah xaaladaha maxaabiista kale ee xabsiga kula jirta.

---

33 Articles 46-58, Part V, of the 1971 Prison Law.

34 Ibid. Article 49.

35 Ibid. Articles 50-55.

Qolka farnijjar/alaabo ma taalo, tusaale ahaan aaladaha jiifka, isla markaana ma laha meel la dhigto aaladaha ama hantida shaqsiyadeed. Maxaabiistu waxa ay ku dhix maydhaan isla qolka dhexdiisa, waxayna meel gees ah kaga beegan tahay qolka, waxana ka xiga gidaar, mana laha irid uu qofka qubaysanayaa iska soo xiri karo. Mana laha biyo socda ee maxaabiista ayaa kasoo qaato taangiyo kuna isticmaala musquusha iyo weliba qubayska. Xaaladada gidaarada iyo meelaha la maro aad ayay u xun tahay, mana ka muuqato in dayactir lagu sameeyay.

Laakiinse waxa xasuusin mudan in Maamulka Xabsigu ay dhawaan dhamaystireen dhisme cusub oo ku yaala dhinaca dumarka, oo loogu talo-galay in laga dhigo workshop-ka dumarka maxaabiista ah. In kasta oo tani tahay horumar wacan oo xabsigani aad ugu baahnaa marka la eego xaalada maxaabiisu ku sugaran tahay. Balse waxa lasoo jeediyyay in dhismahan cusub maxaabiista hoy looga dhigo isla markaana workshop-ka lagu qabto dhismayaasha duuga ah ee xabsiga. Maxaabiista qaarkood waxa ka muuqday calaamado in ay xanuno qabaan, tusaale ahaan xanuunada maqaarka, maxaabiista qaar ayaa aad caato lagu tilmaamay. Maxaabiistu waxa ay noo sheegeen in aan Maamulka Xabsigu maxaabiista siinin waxyaabaha la isku nadiifiyo.

Bishii Maarsio 2012, koox u ka shaqaysa xuquuqada aadamaha ayaa fursad u heshay in ay la kulmaan dumarka maxaabiista ah ee ku jirta xabsiga, waxana ay kooxdaasi waraysiyo dahsoon ka qaaday 12 dumar ah oo markaasi xabsiga ku jiray. Maxaabiistaasi midna ma aanay awoodin in ay sheegto khaas ahaan dambiga lagu soo xiray, waxana ay qaarkood sheegeen in aanay xataa ogayn sababta loo soo xiray. Maxaabiistaasi midna ma aanu lahayn qareen gaar ah ama mid dadweyne oo u dooda,

isla markaana badankoodu ma ogsoonayn xaquuqdooda, tusaale ahaan xuquuqda rafcaanka. Kooxdaasu waxa kale oo ay sooogaadeen:

- In dumarka lagu soo xiro waxyaboo aanu sharcigu u tiixgalin dambiyio. Tusaale ahaan, waxa jiray laba maxbuus oo ay maxkamada degmada ee Hamarweine ay mid ku xukunta 4 billood iyo ka kalana 3 sanadood sababtoo ah “amar-diido”. Waxana xukunkaa loo cuskaday Qodobka 430-aad ee Penal Code-ka oo dhigaya “dhaqan-xumo qoyska dhexdiisa”. Waxana xusid mudan in Qodobkan 430-aa uu ku saabsan yahay ficiilada la xiriira diidmada “waajibaadka awoodaha waalidnimo, masuuliyada caruurta ama guurka”, isla markaana aanu khusayn arinta dumarkan lagu xukumay, kuwaasi oo aan sharciga Soomaaliya ku ahayn dambi. Waxa kale oo xusid mudan in qofka dumarka ah ee lagu xukumay sadexda sano aanay sharciga waafaqsanayn waayo Qodobkan 430-aad xukunkiisu waa ilaa hal sano oo xarig ah.
- Baahsanaanta awooda sharci ee maxkamada ciidamada. Maxkamadanu waxa ay xukuntay lix maxbuus oo lagu soo eeddeeyay in ay xiriir la leeyihiin Al Shabaab, ama hawl-galo u fulinayeen kooxaha falaagada ah. Xukumada ciqaabta ee ay maxkamadaasu xukuntay waxa ay u dhexeeyaan hal sano ilaa 25 sano. Dadkii la waraystay waxa ay sheegeen in xukunadaasi maxkamadu qaadaysay hal maalin oo kali ah.
- In dib loo xaqijiyo in masuuliyada dambigu saaran yahay qofkii gaysta dambigaasi. Waayo dumarka qaarkood ayaa ku doodey in dambiga lagu soo xiray uu geystay ninkooda ama xubno kale oo qoyska ka mid ah. Tusaale ahaan, dumarka maxaabiista ah ee ay Maxkamada ciidanku xukuntay waxa ay qaarkood ku doodeen in

aanay wax xiriir ah la lahayn Al Shabaab, balse waa lagu xukumay waayo ninkeeda oo ka mid ah dagaalyahanada Al Shabaab. Maxbuusad kale waxa ay sheegtay in ay u xiran tahay markii walaalkeed nin dilay kadibna uu baxsaday.

- Laba dumar ah waxa lagu soo xiray sabab la xiriirta in ay ragooda gacan-saareen. Balse labadaadsi dumar ahi waxa ay sheegeen in ragoodu ku hayeen dilmo iyo weliba cabsigalin maanka ah, taasi oo ku kaliftay in ay falaan damiyada lagu soo eeddeeyay.

### **Caruurta**

Hayalka sharciga nidaaminaya caruurta fal-dambiyeedka geysta, waxa uu yahay sharcii duugoobay oo u baahan in wax laga badalo, mana la jaan-qadi karo Sharciga Caalamiga ah ee Xaqqiqa Caruurta (Convention on the Rights of the Child) iyo weliba sharciyada kale ee caalamiga ah ee la xiriira caruurta.

Xeerka Cadaalada Caruurta ee 1970 (The 1970 Juvenile Justice Act) waa xeerka kaliya ee sharciga Soomaaliya ee khuseeya nidaamka, maamulka iyo xabsiyada caruurta.

Sida kor ku xusan, Soomaaliya xubin kama aha Sharciga Caalamiga ah ee Caruurta iyo weliba baratakoolka Ikhtiyaariga ah ee la socda (Convention on the Rights of the Child (CRC) or its Optional Protocols). Qodobka 59-aad ee Penal Code-ka, caruurta da'doodu ka yar tahay 14-sano, kama masuul noqon karaan dambi. Sidaa awadeed qofka waxa dambi lagu soo oogi karaa marka uu gaaro 14-sano. Mana jiraan qodobo gaar ah oo nidaaminaya daruufaha gaarka ah ee loo tixgalinayo caruurta xabsiyada lagu xiro ama xayiro. Laakiinse Qodobka 60-aad ee Penal Code-ku waxa uu dhigayaa in caruurta da'doodu u dhaxayso 14 sano ilaa 18 sano – in

la xayiri karo hadii lasoo xiro ama lagu soo xukumo dambi halis ah oo ay faleen. Balse mudadii qiimeyeenta maamulka Xabsiga ma aanay soo qeexin damiyada loo tixgaliyo dambi halis ah. Sidoo kale waxaa jirta in sharcigu arrimahan khuseeyaa uu ka gaabiyay xaqijintu da'da ilmaha ee lagu xukumi karo xabsi ama xayiraad. Ugu dambayntii, caruurta lagu xukumo dambiyi fudud oo ay galeen, waxa lagu sii deyn karaa cafis, balse waa marka cida ka masuulka ahi ay damaanad qaadaan sharuudaha looga baahdo.

Marka la rabo in ilmaha la xaqijiyo da'diisa, ma jiro hanaan rasmi ah ama la isku waafaqay oo ay isticmaalaan xubnaha ama bahda sharcigu, gaar ahaan garsoorayaashu. Soomaaliya ma laha hanaanka lagu diliwaangaliyo dhalashada ilmaha, Isla markaana waxa da'da ilmaha soo xaqijiya hawl-wadeeno aan khibrad usii lahayn, isla markaana waa mid iska qiyaas uun ku socota waayo ma jiraan heer iyo sharuudo la isla meel-dhigay ama waafaqay heerka caalamiga ah ee da'da lagu qiyaaso. Sidaa awgeed, waxa inta badan dhacda in go'aamadaasi caruurta u horseedaan halis iyo cadaalad daro. Badanaa waxaa da'da ilmaha go'aamiya qareenka dacwada oogaya, balse hadii lagu murmo waxa go'aanka kama dambaysta ah ka gaara garsooraha maxkamada. Hase yeeshiee, qareenka dacwada soo oogaya iyo garsooraha maxkamada midna iskumo hawlo xaqiqda khabirada khibrada u leh ama tusmooyinka caalamiga ah ee ka kaalmayn kara go'aaminta qiyaasida da'da caruurta. Mudadii qiimeyeenta Maamulka Xabsigu waxa uu sheegay in maxkamada uu badanaa ka kaalmeeyo dhakhtar sidii ay u go'aamin lahayd da'da ilmaha. Hase yeeshiee maamulku ma aanay awoodin in ay kala cadeeyaan tusmooyinka iyo qiyaasaha uu dhakhtarkaasi isticmaalo marka go'aan laga gaarayo qiyaasta da'da ilmaha. Sidaa awadeed, go'aamadan la

iska qiyaaso da'da ilmaha waxa ay halis iyo walaac ku tahay cadaalada caruurga.

Ma jiraan xabsiyo khaas ah oo loogu talo-galay caruurga dambiyada-fala. Isla markaana caruurga falalka dambiyada geysta waxa isku meel lagula xiraa maxaabliista mudakarka ah. In kasta oo sharcigu dhigayo in caruurga lagu xiro meel ka soocan meelaha dadka waaweyn, hadana ilaa hada caruurga, rag iyo dumarba, waxa lagu hayaa isla meesha lagu hayo dadka waaweyn. Waxana walaac khaas ahi ka jiraa in aanay jirin meel gaar ah oo lagu xiro gabdhaha. Hadaba tani waxa ay halis wayn oo xaga jismiga iyo saykoolajiga ku haysaa caruurtaa xabsiyadada lagu xiro. Mudadii qjimeyntan la waday waxa ay maamulka Soomaaliyeed sheegeen in waayo hore ay dhacday caruur dirir loogu gaystay xabsiga dhexdiisa, oo xataa qaar lagu dilay. Waxa kale oo jira cadaymo muujinayaa in caruurga cagaha laga xiro, oo lagu layliyo xabsiga dhexdiisa, in kasta oo falalka noocan ahi uu madhuucay sharciga khuseeyaa.

Caruurga xabsiyada lagu xiro ama lagu xayiraa ma helaan hawl-wadeenada saykoolajiga, adeege bulsho ama adeegyo kale oo baahidooda u heegan. Tusaale ahaan ma helaan mashruucyo loogu talo-galay waxbarashadooda, tabo-barkooda ama adeegyo u diyaariya sii deyntooda.

Ugu dambayntii ma jiraan adeegyada talo-bixinta ee dadka dambiyada fala, ama u khaas ah caruurga, mana jiraan xarumo furan oo loogu talo-galay dhaqan-celinta caruurga, wadanka oo dhan kama jiraan.

Guud ahaan, waa iska macruuf in xaaladaha caruurga ee xabsiga ku jiraa ay tahay mid bani-aadanimada ka baxsan, isla markaana xad-gudub ku ah sharciyada caalamiga ah iyo kuwan dawladu ansaxisay, si ay u

waafaqdo heshiisyada caalamiga ah ee qeexaya heerarka ugu hooseeya oo ku waajibka ah in dawladaha si loo tiixgaliyo xaaladaha caruurta lagu xayiro ama lagu xiro xabsiyada.

### **Habka Maamulka**

#### **Miisaaniyada, Qandaraasyada iyo Maamulka Shaqaalah**

Xubnaha qjimeyntanu waxa ay heleen oo kaliya macluumaad iska xadidan oo ku saabsan qaab-dhismeedka maamulka iyo miisaaniyada Ciidamada Asluubta. Bishii Maarsu 2012, waxa la sheegay in tirada Ciidamada Asluubtu yihiin sadex boqol iyo konton qof; sadex boqol waa rag, kontonka kale waa dumar. In kasta oo ciidamada asluubtu ay yihiin hay'ad madani ah oo hoos timaada Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta, balse hadana waxay leeyihiin qaabkii ciidamada iyo darajooyin, waxana ay leeyihiin nidaamka amarada ciidamada.

Ciidamada Asluubtu malaha miisaaniyad joogto ah oo sanad walba loogu qoondeeyo kharashyada ku baxaya. Sidaa awadeed ma jiro diiwaan khaas ah oo laga heli karo kharashyada ku baxa xabsiga. Ciidamada Asluubta ayaa miisaaniyada ay codsanayaan u gudbiya Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta, kadibna wasaarada ayaa usii gudbisa Wasaarada Maaliyada. Marka cosdiga miisaaniyada la diyaarinayo, waxa maasaaniyada lagu saleeyaa inta maxbuus ee ku xiran Xabsiga Dhexe ee Muqdisho. Ciidamada Asluubtu waxa ay ku xisaabtamaan in hal doolar maalin walba loo qorsheeyo maxbuuskiiba. Waxa kale oo u qorshaysan in askari kasta oo ka tirsan Ciidamada Asluubta uu mushaharkiisu yahay 100 doolar bishiiba. Kadib sanad xisaabeed kasta, lama soo gudbiyo waragalin ku saabsan sida miisaaniyada loo sii qaybiyay ama sida kharashyadu u kala baxeen.

## Istaatikiska

Si horumar iyo dibu qaabayn loogu sameeyo xabsiyada waxa lama huraan ah in la sugo xogta ku saabsan tirada xabsiyada ee wadanka ka jira, xaalada maxaabiista ku jirta iyo weliba ururinta macluumaadka saxda ah ee xabsiyada. Waxa iska liidata ama aan jirin karaanka in Ciidamada Asluubtu soo ururin karaan xogta iyo istaatikiska ku saabsan tirada maxaabiista iyo hawl-galada xabsiga. Waxana loo baahan yahay in Ciidamada Asluubtu soo gudbiyaan warbixinjoogto ah iyo istaatiko ku saabsan xaaladaha guud ee maxaabiista. Ilaa hada, waxaan jirin karaanka in xogtaasi loogu soo ururiyo si habaysan oo cilmiyaysan.

## Talo-bixinta

Ilaa hada Dawladda Faderaalka ee Ku-meelgaarka ahi ma aanay soo saarin istaraatajiyo baahsan oo guud ahaan dib-loogu qaabaynayo cadaalada ciqaabta dambiyada, oo ay qeyb ka tahay waaxda xabsiyada. Sida kasoo if-baxday qiimeyntan waxa aad loogu baahan yahay qorshe mudo dheer oo degdeg loo hirgaliyo. Si loo kobciyo aqoonta xirfadeed ee shaqaalaha xabiga (shaqaalaha caadiga ah iyo maamulka sare labadaba) waxa loo baahan yahay in qorshaha horumarinta xabsiyada ay xuduntiisu noqoto sidii loo horumarin lahaa horumarinta shaqaalaha, heerka masuuliyadeed ee shaqaalaha (tusaale ahaan in la sameeyo hanaanka cabashooyinka loo soo gudbin karo iyo sida warbixinada xisaab celinta loo diyaariyo), iyo hanaanka loo maareeyo hantida iyo sahalada. Xaga dhaqan-celinta maxaabiista, waxa aad loogu baahan yahay in la hirgaliyo qorshayaal loogu talo-galay koncinta tabobarida iyo aqoonta maxaabiista, dayactirka hoyga lagu hayo maxaabiista, lana wanaajiyoo daryeelka caafimaadka, nafaqada, xiriirkha iyo weliba adeegyada nashadaadka maxaabiista. Isla markaana loo abuuro mashaariic sahla sidii maxaabiistu bulshada ula

qabsan lahaayeen marka ay xabsigooda dhamaystaan. Waxa kale oo aad loogu baahan yahay in la abuuro mashruuc gaar ah oo loogu talogalay dhaqan-celinta caruurta oo u gaar ah caruurta da'doodu ka yar tahay 18-jir.

### **Kobcinta Karaanka, Aqoonta iyo Masuuliyada Shaqaalaha Xabsiyada**

Qodobo kooban oo sharciga wadanka ka mid ah ayaa si xadidan u xusay kobcinta aqoonta shaqaalaha xabsiyada. Sidoo kale miisaaniyada iyo sahalada loo qoondeeyay waa mid aad uga hoosaysa in ay wax weyn ka badasho kobcinta aqoonta Ciidamada Asluubta. Sidaa awadeed waxa loo baahan yahay in la kordhiyo maalgalinta si loo kasbado shaqaale cusub iyo kuwo sare oo xirfad u leh shaqadooda, isla markaana lagu kabo shaqaale cusub oo rag iyo dumar leh. Tani ayaana ah wadada kaliya ee horseedi karta horumarka waaxda xabsiyada ee Soomaaliya. Waxa kale oo loo baahan yahay shaqaale asluubeed takhasus gaar ah u leh sida loo dhaqan-celiyo caruurta xeerka ciqaabta lala tiigsado.

Muhiimadaha loo baahan yahay waxa ka mid ah in sarkaalada sare ee xabsiyada la siyo tabo-baro kala duwan oo ku saabsan, tusaale ahaan koorsooyinka lagu barto maamulka, iyo weliba in la siyo fursado waayo aragnimo oo ay kusoo arkaan masuulada sare ee ka taliya xabsiyada kale ee Afrika. Waxa kale oo loo baahan yahay in dib looga wada tashado manhajka guud ee tabobarada xabsiga. Hadii kale waxa loo baahan yahay in la aasaaso hanaan cusub oo loogu talogalay tabobarada loo fidinayo shaqaalaha cusub, iyo weliba shaqaalaha hada shaqeeyaa.

### **Horumarinta Habka Maamulka Macluumaaadka**

Waxa aad loogu baahan yahay in la aasaaso hanaan sugar oo suurtogalin kara kormeerida, qimaynta iyo kaydinta macluumaaadka. Waxa kale oo ciidamada asluubtu u baahan yihii in ay helaan aaladdaha IT-ga oo u sahli kara kaydinta xogta biometric-ga, isla markaana in la baro sida qalabkaa loo isticmaalo.

### **Borogaraamada Dhaqan-celinta iyo Tabo-barashada Farsamooyinka**

Beesha caalamku waa inay ugu deeqdaa Ciidamada Asluubta wixii taageero ah ee lama horaanka ah eek u aadan abuurida borogaraamyo wax-ku-ool ah oo loogu talo galay dhaqan-celinta maxaabiista iyo dadka lasoo xayiro. Gaar ahaan waa in xooga la saaro sidii maxaabiista loo siin lahaa waxbarasho aasaasi ah iyo mid heer sare ah oo loogu talo-galay kolba heerka aqoonta ay u baahan yihii. Sidoo kale borogaraamada barashada farsamooyinka waa in la abuuro, laguna taageero qalabka lama horaanka u ah tabobarada. Sidaa awadeed waxa talo-bixinta ku jirta in xabsiga loo sameeyo warshado (iyo beero), iyo weliba istaraatajijiyo hufan oo suuq-geyneed (taasi oo ay ku jiro farsamada iyo dhaqaalaha loo baahan yahay si borogaraamadaa looga sameeyo xabsiyada). Waxana loo baahan yahay in Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta, Wasaarada Shaqaalaha iyo Wasaarada Waxbarashadu ay saxeexaan heshiisyada in ay iska kaashadaan sahlida borogaraamyo waxbarasho iyo koorsoojin farsamo oo laga dhix hirgalin karo xabsiyada.

### **Dayactirka iyo Dibu-dhiska Xabsiga Dhexe ee Muqdisho**

Sida kasoo if-baxday qimentan lagu sameeyay xabsiga Dhexe ee Muqdisho, waxyaabaha ugu muhiimsan ee xabsigu u baahan yahay waxa kamid ah in xabsiga laga dhigo meel amaan ah, xaquuqda aadamaha

lagu dhowro, isla markaana ku haboon xaaladaha dadka lagu soo xiro/xayiro xabsiga. Tusaale ahaan in uu lahaado farnijarka iyo qalabka kale ee muhiimka ah. Gaar ahaan waxa aad loogu baahan yahay in maxaabiista loo kala sooco sida waafaqsan sharciyada lagu soo xiray maxbuusyada.

### **Daryeelka Caafimaadka iyo Ka-hortaga Cudurada**

Xuquuqda caafimaadka ee maxaabiistu waa mid wali taagan. Hadaba maxaabiistu waxay xaquuq u leeyihhin in ay helaan daryeel caafimaad oo u dhigma heerka daryeelka caafimaad ee dadweynaha kale helaan. Markaasi waxa waajib lama-huraan ah in xabsigu yeesho daryeel caafimaad iyo karaanka ka-hortaga cudurada. Gaar ahaan baahida ugu culus ee arrimahan waxa ka mid ah in maxaabiistu hesho biyo nadiif ah iyo aaladaha nadaafada. Wasaarada Cadaadada Diinta iyo Awqaafta iyo Wasaarada Caafimaadku waa in ay kala saxeexdaan heshiis is-kaashi oo ku aadan in ay kobciyaan adeegyada daryeelka caafimaad ee xabsiga.

### **Horumarinta Xaaladaha Dumarka iyo Caruurta xabsiga ku jira**

Xaaladaha dumarka iyo caruurta ee xabsiga ku jirta waa mid aad u qalafsan oo u baahan in ay si gaar ah u fiiriyaan hay'adaha qaranka ee ay khusayso iyo weliba beesha caalamku. Dumarka iyo caruurta waxa ay u nugul yihii in loo soo xiro arrimo aan sharcigu u aqoonsanayn in ay dambi yihii, balse bulshadu u aragto xad-gudubyo dhaqanka ku xadgudbaya. Sidaa awadeed waxa loo baahan yahay in xukunadaa cadaalad darada ahla iska wacyi-galiyo oo karaan korodhsi looga hortago.

#### **a) Caruurta:**

Waxa aad loogu baahan yahay in la sameeyo xarumo gaar ah oo lagu hayo caruurta lagu soo xiro ama xakameeyo dambiyo ay galeen. Waana in

la ogsoonaadaa in xiritaanka caruurtu yahay talaabada ciqaabeed ee ugu dambaysa, lana siyo ilmaha xabsiga ugu mudada gaaban ee ku haboon. Waana in wakhtiyada kale iyo ikhtiyaarka dadkaasi la tiixgaliyo. Sidoo kale waxa jira baahi muhiim ah oo loo qabo kobcinta waxbarashada iyo weliba borogaraamada loogu talo-galay in lagu hayo caruurta dambiyada soo gala. Tani macnaheedu waxa weeyi in la helo meelo kale oo lagu xayiro caruurta, kuwaasi oo laga yaabo in aanay mudnayn culayska damigaasi. In kasta oo tirada maxaabiista caruurta ah ee xabsiyada ku jirtaa aanay hada aad u badnayn. Balse ilaa hada ma jiraan xog lagu kalsoonaan karo oo tilmaamaysa tirada caruurta ah ee ku jirta xabsigan ama meelaha kale ee lagu xayiro dadka. Sidaa awadeed waa in muhiimada la siyyaa sidii loo dhisi lahaa karaanka iyo xirfadaha Maamulka Dawlta iyo Hay'adaha kale ee danta ka leh, si ay usoo ururiyaan xogo lagu kalsoonaan karo. Waxana loo baahan yahay in la hirgaliyo adeegyo ku filan oo loogu talo-galay kobcinta waxbarashada ee caruurta iyo weliba helitaanka nashadaad ku haboon baahidooda. Wuxuu kale oo xusay mudan, in ay jiraan baahida loo qabo waxqabadyo degdeg ah oo lagu hormarinayo walaacyada iyo baahiyaha ugu muhiimsan, tusaale ahaan: la hirgaliyo tabobaro aasaasi ah oo lagu kobcinayo aqoonta xubnaha shaqaalaha ah ee hayalka cadaalada, laguna kordhinayo wacyiga barashada sharciga wadanka iyo kani beesha caalamka ee ku aadan caruurta la horkeeno sharciga; xoojinta ururada madaniga ah si ay caruurta xabsiyada ku jirta ugu fududeeyaa helitaanka taageero saykoolaji ah, caqli-celin (counselling) iyo weliba kaalmo sharchiyeed oo loogu talo-galay caruurta ku jirta xabsiyada.

Asbaabahaasi kor ku xusan oo dhan, waxa ugu sii muhiimsan in la aaburo hanaanka adeegyada talo-bixinta maxaabiista, gaar ahaan kuwa la shaqeeya caruurta, oo kala taliya baajinta dambiyada: hanaanka caruurta

fal-dambyeedka gasha looga weecin karo xabsiyada, tusaale ahaan cadaalada magdhow siinta dhibanayaasha oo ah hanaan si dhakhso ah loogu soo af-jari karo, isla markaana baajin karta hanti badan oo ku baxda kaysaska caruurta oo badanaa ah kuwo si sahlan loo xalin karo.

Ugu dambayntii, sharciga caruurta ee wadanku well waa qabyo, taasi oo lama huraan ka dhigaysa in dibu-qaabeyn baahsan lagu sameeyo, lana tiixgaliyo sidii loo samayn lahaa sharchiyo iyo maamulo sharchiyeed oo casri ah oo u heelan baahida caruurta lala tiigsado sharciga, sharchiyadaasi oo waliba loo baahan yahay in ay noqdaan kuwo la jaan-qaadaya ugu yaraan heer-beegyada ugu hooseeya ee ay waajibinayaan sharchiyada iyo tusmooyinka caalamiga ah ee khuseeya xaquuqda caruurta.

### **b) Dumarka:**

Xabsiga Dhexe ee Muqdisho qaybtiiisa ay ku jiraan maxaabiista dumarka ahi waxa ay u baahan tahay in si degdeg ah loo qalaabeeyo/furnijar loo dhigo. Dumarka maxaabiista ahi waxa kale oo ay aad ugu u baahan yihin in loo sameeyo borogaraamyo loogu talo galay kor u qaadida waxbarashada iyo koorsoojinka farsamada oo ka turjumaya baahida dumarka. Ciidamada Asluubtu waxa kale oo ku waajib ah in ay qaadaan talaabooyinka lama huraanka ah ee lagu tiixgalinayo baahiyaha hooyooyinka wata caruur dhalaan ah marka xabsiga la keeno. Waana in tiixgalinta la siiyo hooyooyinkaasi sida sharciga waafaqsan iyo weliba in ay helaan hanaanka iyo adeegyada waajibka ah ee sharcigu u ogolaaday, tusalaale ahaan hawl-wadeeno aqoon u leh, sida talo-bixiyayaasha maxaabiista ama adeege bulsho kuwaasi oo usoo diyaarin kara maxkamada warbixino ku saabsan caruurta/dhalaanka hooyada si markaasi ay maxkamdaa go'aan cadaali ah uga gaari karto.

### **Maxaabiista in loo Sahlo La-qabsiga Bulshada**

Dawlada waxa kale oo looga baahan yahay in ay muhiimada saarto abuurida mashaariic loogu talo-galay sahalka maxaabiista in ay bulshada dib ula qabsadeen oo dhex gali karaan marka ay soo dhamaystaan xabsigooda. Tani waa in uu qeyb ka noqdo borogaraamka lagu hirgalinayo hanaanka sii-deyntra maxbuuska ee qiimaynta, laguna xirayo siideyntra maxbuuska sharuudo, oo hadii maxbuusku kasoo bixi waayo sharuudahaas xabsiga dib loogu soo celin karo. Hanaankan waa lagu xusay sharciga, balse lama ogsoona in la fuliyo?

### **La-taageero Hanaan iyo Qaabab kale oo Ciqaabeed oo ka Duwan Xabsiga**

Waa in, si degdeg ah, loo fidiyo taagero farsamo oo ku saabsan sidii loo samayn lahaa siyaasad qarameed ku saabsan go'aamada iyo xukunada dambiyada ciqaabta (ivo weliba tusmooyinka la xiriira). Waxa kale oo loo baahan yahay in la abuuro hanaanka iyo karaanka in damiilayaasha lagu kormeeri karo iyaga oo bulshada dhex-jooga, tani waxa lagu bilaabi karaa tijaabo kooban oo lagu cabiri karo in habkanu shaqaynayo iyo in kale. Tani ayaana horseedi karta in si fiican loo maamuli karo dambiliayaasha ay maxkamadu ku xukunto in ay sameeyaan shaqo-bulsho (community services). Hanaanka noocan ahi waxa kale oo uu cadaalada wadanka ee dambiyada u saamaxi karaa in maxaabiista xabsigooda loo maarayn karo siyaabo kale. Tusaale ahaan in maxbuuska hore xabsiga looga sii daayo balse sharuud lagu xiro (conditional releases), xabsi-baajin (suspended sentences) ama probation-ka. Ugu dambayntii kormeera idhaa maxaabiista marka ay xabsiga kasoo baxaan. Habkani waxa uu kaalmayn karaa hanaanka iska cafinta maxaabiista oo dadweynahu had iyo jeer kalsooni doro ka muujiyo.

### **Abuurida Hanaan lagu Kormeero Xabsiyada iyo Xarumaha Xayiraada**

Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Qareenka Guud waa in ay iska kaashadaan abuurida gudi wasaaradeed oo kormeer guud ku samayn karta si ay u hubiyaan in xarumaha xabsiyadu u hawl-galaan sida waafaqsan sharciga. Waana in gudidantu masuul ka ahaataa: dibu eegida in maxaabiista xukun sugayaasha ah aanay dhaafin mudada uu cayimay hanaanka shariyada dambiyada; hubiyo in maxaabiistu helaan gudida ka talisa sii-deynta, isla markaana maxaabiista la sii daayo isla marka uu ka dhamaado mudadii lagu xukumay. Waxana la rumaysan yahay hadii hanaankan la sameeyo in ay yaraan doonto maxaabiista sida sharci darada ah isaga sii xiran xabsiyada.

Waxa Meesha ka maqan Gudi Qarameed oo Qaabilsan Xaqquqada Aadamiga (National Human Rights Commission), sidaa awgeed waxa degdeg loogu baahan yahay in la xoojiyo doorka xafiiska Qareenka Guud (Attorney General's Office)<sup>36</sup> si loo kormeero xaaladaha xabsiyada ee maxaaabiista. Waxa kale oo lama huraan ah in la abuuro hanaan qaraameed hufan oo madaxbanaan oo awood u leh in uu kormeero dhamaan xarumaha lagu hayo dadka xoriyadooda laga xayiro. Intaasi ka bacdi waxa loo baahan yahay in laga taageero Wasaarada Cadaalada, Diinta iyo Awqaafta, iyo weliba Ciidamada Asluubta in ay sii ambo-qaadaan karaan talooyinka kasoo baxa kormeerada lagu sameeyo iyo in ay fulin karaan talo-bixinta loo soo jeediyo.

---

36 Article 14, Part III, of the 1971 Prison Law.

